

HAL-BIXINTA E R E Y A D A KUMBUYUUTARKA

Gorfeyntii Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan



*Habeen iyo dharaar,
Hadalladaan dhisnaa,
Afkeenna hooyo oo,
Horumaraan ku hamminaa,
Hoggaaminnaa,
Had iyo jeer habnaa,
Oo waan hagaajinnaa,
Ma hagrannaa,
Waan u hawl-galnaa,*

Xasan Sh.Muumin (IHUN)¹

Bulsho kasta oo aduunka ku nooli waxay leedahay af ay ku abtirsato kagana duwan tahay ummadaha kale .Afka ummadi wuxuu la jaanqaaada lana kobcaa horumarka ay bulshadu ka samayso dhinacayada kala duwan ee hawl maalmeedka sida dhaqaalaha, waxbarashada, siyaasada, iwm. Sidoo kale wuxuu la hanaqaadaa isbeddelada ku yimaadda dunida ku xeeran. Haddaad dib u jaleecdo buugaagtii dugsiyada lagu dhigan jiray waxaad dareemaysaa in dadka af celinta ku sameeyey ay si xeeldheer oo fiican u yaqaanneen afkooda hooyo iyo dhaqankoogaba. Sidaa si la mid ah waxay u garanayeen aqoonta ay ka af celinayeen. Markaad u fiirsato eraybixintan xisaabta, waxaad fahmaysaa siday dhaqankeenana u soo noolaynayeen, aqoonta xisaabtana u gudbinayeen. Waa laba hawlood oo laysku lifaaqay. Bal ka feker xidhiidhka dhaqamadeed ee ka dhexeeya erayadan iyo qaybta xisaabta eey ka af tebinayaan:

Slope and slope of the equation = Tiirada iyo tikraarka isleegta

Isleegtu waxay ku Wanqaran dhidibka X = The equation is symmetric to the X-axis


Fansaar = function

Saab =Parabola

Focus = **Kulmis**

Directrix = **Jeedshe.**

¹ Halabuurkii, heesaagii, laxan-dhaadhigii, taariikhyahanka ahaa – Boobe Yuusuf Ducaale



(Xisaabta Fasalka Saddexaad ee dusiga sare)

Ama bal u fiirso xeerkaa saddexaad ee *Keplar* marka af tebin qurux badan lagu sameeyey:

“Majiiraha meerayaashu waa goobo qabaal ay qoraxdu bar kulmis u tahay”

Tani waxay si qiimo leh u suurtoogalisay in si fudud loo xafidi karo loona baran karo macnaha xeerkaasi gudbinayo, iyadoo arday kastaa fahmayo ujeeddada xeerka, awood u helayo inuu isticmaalo afkiisa hodanka ah ee aqoonyahankeennu ku soo gudbiyey.

Ragga aynu u tirino dadaalkaa waxaa ka mid ahaa *Xasan Aw Daahir*(iminkana *Professor Jaamicada Camuud*), *Bashiir Faarax Kaahiye*(IHUN), iyo kuwo kale oo badan. Hase yeeshee, u fiirsasho la'aanta arrintaasi waxay hanasiisaa dad badan inay yidhaahdaan eray bixin looma heli karo aqoonta cusub sida tan Computer-ka, waxaase arrintaa si la yaab leh u gorfeeyey dadaalkaa la iska indhasaabayna dib u soo nooleeyey *Cabdiraxmaan Faarax “Barwaaqo”* oo qalinkaasi iyo waqtigiisa u huray siduu eray bixintaa innooga haqab tiri lahaa markuu qoray buug dhan oo ka hadlaya eraybixinta aqoonta Computer-ka oo uu ugu magac daray : *“Hal-bixinta Erayada Kombiyuutarka”*

Bishii hore (January 2008) waxa, haddaba, ii suurtoogashay inaan akhriyo buuggan inkastoon isaga oo gacanta lagu hayo aan si kor ka xaadis ah u dulmaray horaantii sannadkii 1991kii annagoo ku sugan magaalada *Diredawa* ee carriga Itoobiya. Markaai oo uu qoruhu talowadaag kala yeelanayey abwaan Maxamed Ibraahim Warsame “Hadraawi”.

Buuggani wuxuu ka kooban yahay ugu yaraan toban cutub. Waxaanu si qoto dheer ugu talax tagey dhinacyo badan oo Kombiutarka ah, taasoo innoo fududaynaysa barashadiisa oon u baahneyn qofku inuu af qalaad yaqaano .

Oggoli oo waxbarashadu wey egtehee
Af gumayeynu addoon u nahay
Ammankaag iyo yaab argaggax
Aboowe macaanow ii sheeg maxaa kuu daran
Abaaye macaaney waan asqaysanehee
Af qalaad aqoontu miyaa?

Cali Sugule²

² Mareegta suugaanta somaliland

Buuggani wuxuu si la yaab leh u soo bandhigayaa eray bixin aad u la yaab leh oo si xeeldheer kuu baraysa dhaqankeenna qotada dheer. Runtii markaan akhriyey waxaan aad ugu farxay in ay jiraan dad u heelan horumarinta afkeena hooyo, una huraya inta mudan oo dhan sida waqtiga iyo maalka .

Markaad si heersare ah ugu fiirsato abwaannada nool, ka sokow curinta maan-sooyinka lagu yaqaan, waxay soo nooleeyeen dhaqankii ummaddani laheyd sugeenna inuu sii jiro. Sidoo kale ayuu qoraha buugganina (Barwaaqo), ka sokow u tafaxaydashada iyo sugidda inuu afka Soomaaligu la hanaqaadi karo aqoon kasta dhinaca eraybixinta, wuxuu soo noolaynayaa dhaqankeennii suubanaa. Waxaanu inna barayaa hab nololeedkii ka jiray miyiga.

Waxaa si la yaab leh ii soo jiidatey siduu ugu xulay eraybixinta isagoon ka tegayn macnihii uu xanbaarsanaa erayga laga af celinaya taasoo had iyo jeer dhacda marka la sameynayo af tebin (nothing gets lost in translation in this book).

Qofka inuun isku dhibay barashada computer-ku wuxuu garanayaa in weeleeyaha computer-ka loo yaqaan Hard-drive. Haddaad soo iibsato oo uu kuugu yimaaddaa sifo ah “*unformatted*” ma isticmaali kartid. Cabdiraxmaan Barwaaqo markuu eegay arrintan ayuu dhaqankeennii dib ugu noqday, ogaadayna inaan wheelka qabada ah la adeegsan, waxna lagu shuban, lana yidhaa ‘*Gocayo*’. Sidaa darteed ayuu qoruhu eraygaa gocayada ugu adeegsadey ka falcelinta erayga ‘*unformatted*’. Marka loo diyaarinayo weeleeyahana –Hard drive- in la siticmaalo waa la *format-gareeyaa*. Isaga oo arrintaa Soomaaliyeynaya wuxu yidhi qoruhu, “ Kolka haan ama gorof iwm., laga saarayo gocayanimada waa la agloolaa, ama waa la xooleeyaa ama waa la layeeyaa qofba sida uu u yaqaan.” Erayada *xoolaynta*, *layeynta* ama *aglooliddu* dhamaantood waa isku macno. Hase yeeshee degaanno kala duwan baa lagu kala adeegsadaa. Sidaa darteed buu qoruhu ereyada isugu macneeyey:

Format - **Aglool**.
Formatted - **Agloolan**.
Formatting - **Agloolid**.
Reformat - **Dib u aglool**
Unformatted - **Gocayo ah**.

Qoruhu isagoo tusaale kale inna siinaya wuxuu yidhi:

Inta aynaan weli ka soo geddoomin xaggii miyiga, xadhig kolka la soohayo, ninkii arkay aragye, hadba laag baa gaabata markaasaa tu kale (laag kale) oo hor leh lagu dabakaraa. Sidaas baana xadhigga hadba dhererka la doonayo lagu gaadhsiiyaa. Dabakariddaa,haddaba, waxa loo yaqaan "nudid". Laag ta wax lagu nudayana “nud” baa la yidhaah. Kumbuyuutarkana sidaas oo kale ayaa kolka meeris (text) lagu qoro hadba loo dabakaraa oo wixii ka dhiman loogu daraa. Taas oo iyana loo yaqaan "Appending". Labadaa arrimoodba sidaa ayey isugu dhigmaan oo si hawl yar la isugu hal-tebin karaa. Ereyaduna waxay isugu dhigmayaan sidan :

Append - **Nud.**
Appended - **Nudan.**
Appending - **Nudid.**

Waxaan kusoo gabagabeynaynaa inuu buuggani yahay mid si hagar la'aaneed loo haqabtiray, looguna farayareystay, kuna habboon yahay inuu qof kastaa dhigto qolka buugaagta kaydkiisa -Library-. Waa buug dib inoo xasuusiyey hawlqabadkii dadkii innaga horeeyey ee af celiyey buugaagtii dugsiyada lagu dhigan jiray, sidoo kale wuxuu innagu dhiirigalinayaa barashada afkeenna hodanka ah. Waxanu inna farayaa in aynu siinno waqti aan ku barano inta aynaan la soo boodin aqoonta cusub lama socon karo oo buugan horteena yaala si xarago leh u beeniyey.

Buuggan iyo buugiisii hore ee Mahadhada iyo waxqabadka Maxamed Xaashi Dhamac “Gaariye” waxaa laga heli karaa oo laga dalban karaa mareegtan:

<http://www.lulu.com>

ama guji nudkan hoose :

[Halbixinta Erayada Computerka](#)

Sidaa iyo akhris wanaagsan

Fu,aad
Bahda Mareegta Farshaxan..